MINNESOTA

# Kalfadhiga Macluumaadka Provider Hub | Nofeembar 2025

Warqaddan kooban waxaa ku jira xiriiriyeyaashii lagu wadaagay Kalfadhiga Khadka-tooska ah ee Macluumaadka Provider Hub, kaas oo la qabtay Talaadadii, Nofeembar 18, 2025.

Haddii aad qabto su'aalo daba-gal ah, ama haddii aanan helin waqti ku filan oo aan kaga jawaabno su'aashaada inta kalfadhiga uu socday, waxaad si xor ah ugu soo diri kartaa iimayl kooxda Provider Hub providerhub@state.mn.us.

## Diiwaangelinta

Diiwaangelin laga duubay kalfadhiga — oo ay ku jiraan su'aalaha ka-qaybgalayaasha iyo jawaabaha bixiyeyaasha — ayaa sidoo kale la heli karaa.

**Hel Cinwaanno (Captions) ku jira luqado aan Ingiriis ahayn:** YouTube, oo lagu martigeliyo diiwaangelintan, waxa ay bixisaa cinwaanno si toos ah loogu turjumay muuqaalada. Si aad u hawlgeliso astaantan:

1. Xulo astaanta **Settings** ee ku taal geeska hoose-midig ee muuqaalka — waxay u egtahay qalab wareegsan (gear).
2. Xulo **Subtitles/CC**, ka dibna **Auto-translate**.
3. Xulo **luqadda aad doorbidayso** liiska xulashooyinka.

**Qoraal Ka-Digitaan (Disclaimer):** Marka la adeegsado astaantan, YouTube ayaa si toos ah uga turjumaysa cinwaannada Ingiriisiga luqadda aad doorатay. Dowladda Minnesota ma aysan dib u eegin turjumaadyadan mana damaanad qaadi karto in ay sax yihiin.



*Updated 11/18/2025. Qoraalkan mowduucayada ku jira waa mid hadda jira ee taariikhdan la soo bandhigay. State of Minnesota waxay xaq u leedahay inay cusboonaysiiso ama dib u eegto sida ay markaa u aragto.*
*©2025 State of Minnesota. All Rights Reserved.*

## Xiriiriyeyaasha Macluumaad Dheeraad ah

- **Bogga Provider Hub:** Waxaad ka heli kartaa qaybo ku saabsan agabka/tababarrada, wargeysyada, kalfadhiyadan macluumaadka, warbixinaha soo-saarka , cusboonaysiinta ku saabsan bilawga shatiga daryeelka carruurta ee qoysaska, iyo in ka badan!
- **Macluumaadka barnaamijka/xeerarka ee ku saabsan astaamaha hadda ku jira Provider Hub:**
    - Shatiga/shahaadada daryeelka carruurta: Department of Children, Youth, and Families (DCYF) Licensing Division
    - Maareynta isdiiwaangelinta bixiyeyaasha Barnaamijka Child Care Assistance Program (CCAP): Child Care Assistance Program Information for Child Care Providers iyo isbeddellada cusub ee ku dhacay habka isdiiwaangelinta bixiyeyaasha CCAP
    - Ka-qaybgalka Great Start Compensation Support Payment Program: Great Start Compensation Support Payment Program, su'aalaha inta badan la isweydiiyo (FAQs) iyo wararka barnaamijka, cusboonaysiinta, iyo hawlgelinta bulshada
- **Cusboonaysiinta Dayrta 2025 ee Ku Saabsan Bilawga Shatiga Daryeelka Carruurta ee Qoysaska ee Provider Hub (PDF)** — nooca Ingiriisiga ah waxaa laguu soo diray iimayl Nofeembar 10
- **Maktabadaha waxbarasho ee muuqda — uruurin ilo ah oo kaa caawinaya inaad dhammaystirto hawlaha ku jira aaladda khadka tooska ah:**
    - Provider Hub Basics
    - User Access
    - Licensed Child Care Centers | Licensing
    - Certified Child Care Centers | Certification
    - Ilooyinka Tignoolajiyada waxa ku jira kuwan oo lagu heli karo luqadaha Ingiriisiga (English), español (Spanish), Soomaali iyo Hmoob (Hmong): Tech Skills Self-Assessment, Tech Skills Support Guide iyo Tech Skills Printable Resource List



*Updated 11/18/2025. Qoraalkan mowduucayada ku jira waa mid hadda jira ee taariikhdan la soo bandhigay. State of Minnesota waxay xaq u leedahay inay cusboonaysiiso ama dib u eegto sida ay markaa u aragto.*
*©2025 State of Minnesota. All Rights Reserved.*

    - Waxaad ka heli kartaa kuwaan oo dhan (iyo kuwo kale!) bogga Provider Hub, qaybta hoose ee **Resources**.

- **Ma tahay isticmaale Provider Hub oo hadda jira?** Buuxi sahankan si aad noogu sheegto sida aaladda khadka tooska ahi kuugu shaqayso! Waxaad ku dhammayn kartaa 5–10 daqiiqo adigoo adeegsanaya luqadda aad doorbidayso Ingiriis (English, español, Soomaali ama Hmoob).
- **Isticmaale hadda jira oo u baahan caawimaad ku saabsan Provider Hub?** Gudbi kiis markaad ku jirto Provider Hub ama wac 651-431-6075. Kooxda taageerada deegaanka waxay ka jawaabaan codsiyada Isniin ilaa Jimce inta u dhaxaysa 8 subaxnimo ilaa 4:30 galabnimo.

## Hel Macluumaad Dheeraad ah

Kalfadhiga xiga ee Macluumaadka Provider Hub waxaa si ku-meelgaar ah loo qorsheeyay inuu dhaco bisha Janaayo. Faahfaahinta — oo ay ku jiraan taariikhda, waqtiga iyo xiriiriyaha isdiiwaangelinta — waxaa lagu dari doonaa wargeyskeena bisha Diseembar waxaana sidoo kale lagu dhejin doonaa boggeena internetka.

## Ku Saabsan Provider Hub

Provider Hub waa aalad khadka tooska ah oo loogu talagalay bixiyeyaasha adeegyada bulshada si ay ugu codsadaan una maareeyaan shatiyada, maalgelinta iyo barnaamijyo kale oo dawli ah. Provider Hub waxaa lagu isticmaali karaa kombuyuutar, tablet ama taleefon casri ah. Waxa kale oo lagu heli karaa afafka Ingiriisiga, Isbaanishka, Soomaaliga iyo Hmong.

Dowladda Gobolka Minnesota waxay sii waddaa horumarinta aaladda khadka tooska ah iyo dhisidda astaamo cusub. Markaan horumarinno aaladda, bixiyeyaasha dheeraadka ahi waxay heli doonaan gelitaanka. Booqo bogga Provider Hub si aad u hesho faahfaahin dheeraad ah.



*Updated 11/18/2025. Qoraalkan mowduucayada ku jira waa mid hadda jira ee taariikhdan la soo bandhigay. State of Minnesota waxay xaq u leedahay inay cusboonaysiiso ama dib u eegto sida ay markaa u aragto.*
*©2025 State of Minnesota. All Rights Reserved.*